# Shuruudaha Qalin-jabinta ee Gobalka Washington



Gudiga Waxbarashada Gobolka (State Board of Education, SBE) wuxuu dejiyaa shuruudaha qaqjabinta ee gobolka. Jaantuska soo socdaa wuxuu tusinayaa sadexda qaybood ee loo baahan yahay in lagu kasbado shahaado dugsi sare iyo sida ay isaga kaashadaan si ay u fuliyaan ujeedada dibloomada.

**Dugsiga Sare iyo Qorshaha ka dambeeya**

Aalad qorshayn oo ka caawiya ardaydu inay aqoonsadaan waxa ay xiiseeyaan, dejiyaan hadafyada, oo ay doortaan koorsooyinka iyo hawlaha dugsiga sare.

**Shuruudaha Dhibcaha iyo Qeybaha Maadooyinka**

Ardaydu waxay horumariyaan aqoonta iyo xirfadaha lagu qeexay heerarka waxbarashada gobolka ee asaasiga ah iyo maadooyinka kale.

**Ikhtiyaarada Dariiqa Qalin-jabinta**

Hababka ay ardaydu u muujiyaan u diyaargarowga waxbarashadooda gaarka ah iyo hadafyada shaqo ee noloshooda dugsiga sare kadib.



**Ujeedada**

Si loo cadeeyo in ardaygu diyaar u yahay guusha:

- Waxbarashada Dugsiga Sare Kadib
- Shaqaalayn Waxtar Leh
- Ka Qeybgalinta Dadweynaha
- Waxbarashada Nolosha oo Dhan ah

**(Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 28A.230.700)**

Degmooyinka dugsiyadu waxay ku dari karaan shuruudo dheeraad ah oo qalin-jabineed oo ka sareeya shuruudaha ugu yar ee gobolka. Degmooyinku waxay ku dari karaan dhibcaha dheeraad ah iyo shuruudo maadada (tusaale, koorsada aqoonta dhaqaalaha) ama shuruudaha kale sida mashruuc sare ama saacadaha u adeega bulshada.

Ardayda waxa loo qoondeeyay sanad qalinjabin oo la filayo wakhtiga ay galayaan fasalka sagaalaad. Waxa lagu dabaqayaa shuruudaha qalinjabinta ee sanad dugsiyeedkaas iyada oo aan loo eegin sannadka ay dhab ahaantii dhammeeyeen dugsiga sare.

## Dugsiga Sare iyo Qorshaha ka dambeeya (HSBP)


Qorshaha High Dugsiga iyo Kadib (High School & Beyond Plan, HSBP) waa habrac qorshayn shakhsi ahaaneed kaas oo caawiya ardayda – oo ay weheliyaan qoysaskooda iyo macalimiintooda - inay u gudbaan dugsiga sare una diyaargaroobaan mustaqbalkooda. Arday kastaa wuxuu HSBP ku bilaabo fasalka 7aad, waana la cusboonaysiiyaa sanad kasta si uu uga tarjumo xiisahooda, yoolalka, iyo baahiyahooda isbadalka ah. HSBP waxa ku jira koorsada dugsiga sare oo la socota qorshayaasha dugsiga sare ee ardayga, taageero kasta oo ardaygu u baahan karo si uu u qalin-jabiyo, qoraal hawleed ay ku jiraan khibradaha manhajka ka baxsan ee ardayga, iyo cadaynta uu ardaygu helay macluumaadka kaalmada dhaqaale ee barnaamijyada dugsiga sare kadib.



# Shuruudaha Dhibcaha iyo Qeybaha Maadooyinka

Si ay u qalin-jabiyaan, ardaydu waa inay dhamaystiraan wadarta 24 dhibcaha — 17 buundooyinka asaasiga ah iyo todoba dhibcood oo dabacsan. Tan waxa ku jira afar dhibcood oo Ingiriis ah iyo sadex dhibcood oo xisaab ah, oo ay la socdaan maadooyin kale (ka eeg jaantuska).

Heerarka waxbarashada ayaa qeexaya waxa ardaydu tahay inay ogaadaan oo ay awoodaan inay ku sameeyaan maado kasta heer fasal kasta. Si loo kasbado dhibcaha, ardaydu waa inay si guul leh u dhamaystiraan koorsada ama hadii kale ay muujiyaan inay buuxiyeen heerarka waxbarashada.




**Fiirooyink Gaar ah:**

1. Shuruudaha dariiqa shaqsi ahaaneed (Personalized pathway requirements, PPR) waa xulasho maado kasta oo la socota HSBP ee ardayga. Dhibcaha farshaxanka iyo luuqada aduunku waa soo jeedinta la soo jeediyay, laakiin waxaa lagu badali karaa xulashooyin kale oo si fiican u taageeraya hadafka ardayga.
2. Degmooyinka waxaa loo ogolaaday inay ka tanaasulaan ilaa laba dhibcood oo dabacsan oo ah shuruudaha dhibcaha 24 ee xaaladaha arday gaar ah.

# Ikhtiyaarada Dariiqa Qalin-jabinta

2019, sharcigu wuxuu meesha ka saaray shardi ah in arday gaar ahi ku baaso gobolka qiimaynta la habeeyey si loo qalin-jabiyo laguna badeloikhtiyaaro dariiqooyin la dajiyay ah. Ikhtiyaaradda dariiqa qalin-jabinta waxay siisaa ardayda habab badan oo ay ku muujiyaan u diyaargarowga waxbarashadooda shakhsiga ah iyo hadafyada shaqo. Hadafka ardayga ee dugsiga sare ka dambe sida lagu qeexay Dugsigooda Sare iyo Qorshaha ka dambeeya.

- Qiimaynta Gobolka
- Koorsooyin Labada Dhibcood ah
- Imtixaanada AP/IB/Cambridge
- Imtixaanka Galitaanka SAT/ACT College
- Koorsooyinka Kala Guurka
- Waxqabad Ku Salaysan
- Isku dhafka
- Koorsada U Qalmitaanka Ku biiritaanka Ciidanka Qalabka Sida (ASVAB)
- Isku Xigitaanka Koorsada Waxbarasho Mihnad ahaaneed iyo Farsamo ahaaneed (CTE)

Ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay xagga Luuqada Ingiriisiga (English Language Arts, ELA)iyo xisaabta labadaba, si kastaba ha ahaatee waxay sidaas ku samayn karaan iyagoo isticmaalaya wadooyin kala duwan. Tusaale ahaan, ardaygu wuxuu ku dhamayn karaa shuruudaha ELA iyada oo loo marayo qiimayn hawl-qabad ku salaysan iyo shuruudaha xisaabta iyada oo loo marayo koorsada kala-guurka. Ardayda qaata dariiqooyinka Koorsada U Qalmitaanka Ku biiritaanka Ciidanka Qalabka Sida (Armed Services Vocational Aptitude Battery, ASVAB) ama Isku Xigitaanka Koorsada Waxbarasho Mihnad ahaaneed iyo Farsamo ahaaneed (Career and Technical Education Course Sequence, CTE) uma baahna inay buuxiyaan shuruudaha Ingiriisiga iyo xisaabta si gooni ah maadaama Ingiriisi iyo xisaabtu ay ku dhex jiraan labadan wado.

Degmooyinka dugsiyadu waxay go'aansadaan dariiqyada la bixinayo si ay helaan kala duwanaadaan gudaha iyo degmooyinka dhamaan.

**Waxyaabaha ku saabsan Gudiga:** Washington State Board of Education waxay qaabeynaa xeerarka oo aan u doodnaa nidaamka waxbarashada K-12 dadweynaha gobalka. Iyadoo loo marayo diirad saarida xeeladeysan iyo ka qeybgelinta dhabta ah, waxaan rajeyneynaa inaan abuurno nidaamka waxbarashada K-12 ee loo simmanyahay iyo loo dhanyahay halkaasoo arday walba lagu xoojiyo aqoonta iyo xirfadaha ay u baahanyihiin si ay ugu kobcaan caalamka isbadelayo.

Websaytka: sbe.wa.gov • Telefoonka: 360.725.6025 • Iimaylka: sbe@k12.wa.us

*Markii u dambaysay ee wax laga badalay 4/7/2025*